

Fahamka Caymiskaaga Caafimaad

Waxkabadalista Daboolista Caymiska

Marka ilmahaagu qabo baahi daryeel caafimaad oo gaar ah, daahitaanka korriinka ama naafanimada, waa muhiim inaad fahanto kaabista caymiskaaga. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad wax badan ka ogaato kababka caymiskaaga caafimaadka iyo sida caymiska loogu isticmaali karo in lagu maalgaliyo barnaamijka barbaarinta ee ilmahaaga. Waxaad isticmaali kartaa xaashida Xaqijinta Caymiska ku lifaaqan oo leh tilmaamo faahfaahsan si aad u ururiso macluumaadkan si aad ula wadaagto Family Resources Coordinator (Isuduwaaga Khayraadka Qoyska) (FRC) iyo Kooxda Barbaarinta.



Wax Ka Baro Qorshahaaga

Barashada caymiskaaga waxay kaa caawin doontaa inaad samayso go'aamada ugu fiican si aad u buuxiso baahiyaha ilmahaaga. Qorshahaaga caymisku waxa uu leeyahay Sharaxaada Qorshe Kooban, dhukumenti soo koobaya caymiskaaga oo ku siinaya xoogaa hagiis ah sida loo helo bixiyeyaasha aqbala caymiskaaga iyo/ama ku jira shabakadaada. Iyadoo ku xidhan loo-shaqeeyahaaga iyo bixiyaha caymiska, tani waxay noqon kartaa dhukumenti warqad ah ama macluumaad aad ka akhrisan karto intarnatka. Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan qorshahaaga, la xidhiidh waaxda xidhiidhka dadka ee loo-shaqeeyahaaga ama macluumaadka adeegga xubinimada ee kaadhkaaga caymiska.

Su'aalaha Guud ee lagu Waydiin karo Qorshahaaga

Marka laga soo tago aasaaska barashada waxa qorshahaagu daboolayo, waxaa muhiim ah inaad wax ka barato sharciyada looga baahan yahay caymiska:

- Qorshahaagu miyuu u baahan yahay gudbin dhakhtarkaaga ama adeeg bixiyaha kale si uu u arko dhakhtar si gaar ah ugu takhasusay?
- Qorshahaagu ma u baahan yahay gudbin si uu u arko daaweeyaha/barnaamij gaar ah oo bixiya adeegyada barbaarinta (tusaale, Daaweeyaha jimicsiga, Daaweeyaha shaqada, Daaweeyaha hadalka, Nafaqeeyaha)

- Sideen ku heli karaa gudbinta? Booqasho xafiis? Ogaysiis xilli hore? Kuwo kale?
- Intee inleeg oo booqasho ah ayuu daboolayaa qorshahayga sanadku? Gudbintu ma u baahan tahay cusboonaysiin? Ma ku heli kartaa ogolaansho booqashooyin badan oo telefoon ah mise waxaad u baahan tahay inaad ballan kale ku booqato dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah?
- Waa maxay ballanta, baadhista iyo nidaamyada u baahan oggolaanshaha hore? Dhakhtarku ma heli karaa oggolaanshaha kahor mise waxaad u baahan tahay inaad si toos ah ula xidhiidhdo qorshahaaga caafimaad?
- Ma lagaa rabaa in aad isticmaasho bixiyeyaasha ogolaaday in ay daboolaan qorshaha (bixiyeyaasha shabakada)?
- Haddii aad sidoo kale arki karto dhakhaatiirta ama bixiyeyaasha kale ee adeegga caafimaadka kuwaas oo aan ka mid ahayn qorshahaaga (daboolista ka baxsan shabakada), xeerar nooc ee ah ayuu qorshuhu u leeyahay in la arko dhakhaatiirta ama bixiyeyaasha kale ee adeegga? Maxay kugu kacaysaa inaad isticmaasho bixiye ka baxsan shabakada?
- Ma arki kartaa dhakhtar ama adeeg bixiye kale oo aan ku jirin shabakada qorshahaaga xaalad degdeg ah haday timaado ama markaad safraysid? Hadday sidaas tahay, waa maxay kharashka kugu kacaya?

Kalaxidhiidh:

Barnaamijka Department of Children, Youth & Families Early Support for Infants and Toddlers (Kaalmaynta Caruurta Naafada ah iyo Socod-baradka ee Waaxda Caruurta, Dhalinyarada & Qoysaska)
PO Box 40970 Olympia, Washington 98504-0970 | esit@dcyf.wa.gov
www.dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Daruuriyaadka Caafimaadka

Xitaa haddii aad ogtahay kababka qorshahaaga caafimaad dabooli doono iyo sida biilasha u shaqeeyo, waxaa laga yaabaa inaad weli dhibaato kala kulanto helitaanka adeegyada barbaarinta ee ilmahaaga. "Daruuriyaadka caafimaadka" waa ereyga ay shirkadaha caymisku isticmaalaan si ay u go'aamiyaan baahida caafimaad ee daaweyn gaar ah ama nidaam. Qeexitaankan waxa loo isticmaalay sidi go'aaminta lacagta daawaynta iyo hababka ilmahaagu u baahan karo.

Waa inaad had iyo jeer raadisaa qorshahaaga qeexitaankiisa baahida caafimaad; Qeexitaan kasta oo ku saabsan baahida caafimaad waxay leedahay meel lagu turjumo. Haddii aad u baahan tahay inaad caddayso baahi caafimaad, warqad waxaa qori kara Bixiyaha Daryeelka Koowaad, ama bixiye kale oo caafimaad oo codsanaya adeegga.

Codsiga diidmada

Haddii qorshahaaga caafimaad aanu bixin adeeg ama aanu hore ugu heshiin adeeg, markaa waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad rafcaan ka qaadata go'aanka qorshaha caafimaadka. Iyadoo FRC ama adeeg bixiyahaagu ay awoodi karaan inay kula shaqeeyaan adiga iyo qorshahaaga caafimaadka si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sababta caymisku u bixinayn kharashka adeegga, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad bilowdo rafcaan. Macluumaadka habka rafcaanka ee qorshahaaga caafimaad waxay ku jirtaa Caddaynta Daboolista. Habka rafcaanka qorshaha caafimaadka wuu ku kala duwanaan doonaa qorshaha caafimaadka si aad naftaada u barato habka isla markaa aad dib u eegayso caymiskaaga. Foomka Explanation of Benefits (Sharaxaada Kababka) (EOB) ee qorshahaaga ayaa kuu sheegi doona haddii adeeg la daboolay iyo in kale. Qorshahaaga caafimaad maaha inuu daboolo dhammaan adeegyada ilmahaaga waana inaad marka hore hubisaa buug-yaraha Caddaynta Daboolka si aad u hubiso in qorshahaagu uu daboolayo adeegga la diiday. Guud ahaan, tallaabooyinka soo socda ayaa la qaadi karaa:

- Haddii aad aaminsan tahay in adeegga si qalad ah loogu diiday, waxaad kula xidhiidhi kartaa qorshahaaga taleefan si aad ugala hadasho EOB-gaaga. Tani waa habsocod dib u eegis aan rasmi ahayn. Hubi in aad qoraal kasta ka heshay natiijada dib u eegista aan rasmiga ahayn maadaama aanad rafcaan ka qaadan karin wicitaan telefoon.
 - Ku qor diiwaanka taleefoon kasta qorshahaaga oo wata magaca qofka aad la hadashay iyo qoraalada wada hadalka. Haddii wakiilka qorshaha caafimaadka uu kula soo noqdo macluumaadka, hubi inaad ogaato goorta aad si maqquul ah u filan karto jawaab iyo la socoshada qorshaha caafimaadka haddii aanad dib u maqal.

- Haddii wakiilkaaga adeegga macaamiisha uu sheego in qorshahaagu aanu dabooli doonin adeeg, waxaad weli soo gudbin kartaa cabasho caymis. Waxaad u baahan doontaa diidmo qoraal ah haddii aad rabto inaad sii waddo rafcaanka rasmiga ah.



- Haddii aad go'aansato inaad xarayso rafcaan rasmi ah, waa inay ahaataa qoraal.
 - Qorshahaaga caafimaad waxa laga yaabaa inuu haysto foom rafcaan ah.
 - Haddaysan ahayn, Caddaynta Daboolista ayaa qeexi doonta habka rafcaanka.
 - Had iyo jeer hayso koobiga rafcaankaaga qoraal ah.
- Filo inaad ku bixiso macluumaadka soo socda rafcaanka
 - Magacaaga, ciwaankaga, iyo lambarka taleefankaaga
 - Lambarka aqoonsiga xubinimada ama Social Security number (Lambarka Bulshada Adeega)
 - Nuqullada Explanation of Benefits (Sharaxaadda Kababka, EOB) foomamka iyo magaca bixiyahaaga iyo foomka biilasha
 - Sharaxaada adeegga ama nidaamka aad rabto in la daboolo
 - Macluumaadka taageeraya sababta adeegga loo daboolayo

Waxa laga yaabaa inaad ku xarayso rafcaankaaga muddo cayiman gudahood. Rafcaannada lagu xareeyay meel ka baxsan muddada la oggol yahay ma tixgelin doono qorshaha caafimaadka. Xaaladaha qaarkood, qorshuhu wuxuu yeelan karaa nidaam gaar ah oo ku saabsan kiisaska degdegga ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka Caymiska ee Gobolka Washington, wac Khadka Macmiilka ee Caymiska 1-800-562-6900.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maalgelinta daryeelka caafimaadka carruurta qaba baahiyaha daryeelka caafimaad ee gaar ah, daahitaan korriin, ama naafanimo, wac qolooyinka Qoysaska u Qaabilsan Gobolka Washington 1-800-5-PARENT.

Warqada Xaqiijinta Caymiska

Magaca Ilmaha: _____ Magaca Waalidka: _____

TAARIKHDA DHALASHADA ilmaha (DOB): _____ Baadhista Ilmaha: _____

Tixraacista Dhakhtarka: _____

Macluumaadka Caymiska: *Fadlan wac Shirkaddaada Caymiska oo buuxi foomkan sida ugu fiican ee aad awooddo. Tani waa macluumaad aad waxtar u leh haddii aadan aqoon u lahayn caymiskaaga.*

Magaca Caymiska: _____ Taleefanka: _____

Ciwaanka Sheegashada: _____

Magaca Lacaymiyaha: _____ ID #: _____

Qorshe/Koox #: _____ Taariikhda Dhaqangalka ah ee Siyaasadda: _____

Markaad wacdo, hubi inaad qorto magaca qofka aad la hadasho si aad mar dambe tixraacdo.

Halka lagala xidhiidhayo Shaqsiga: _____ Taariikhda, Wakhtiga wicitaanka: _____

Waxaad dhahdaa, "Waxaan wacayaa si aan u caddeeyo kababka iyo caymiskayga faaliidooyinka horumarinta neerfayaasha." (ID #) Weydii su'aalo ku filan si aad u buuxiso dhammaan macluumaadka. Macluumaadka aan dhamaystirnayn wuxuu u baahan doonaa wicitaan kale.

Waa barnaamijka dhakhtarkayga/El, _____, ee Liiska Bixiyaha ka qaybqaadanaya?

Haddii dhakhtarkaagu/Barnaamijka El ee doorashadu aanu ku jirin shabakadooda, markaas weydii su'aalahan:

"Siyaasaddaydu miyay ii ogolaataa inaan doorto dhakhtarkayga?" _____

"Ma ka bixi karaa meel ka baxsan shabakadayda ama liiska bixiyaha?" (Hadday sidaas tahay, "Caymiskaygu ma ka duwan yahay, oo maxay ku kala duwan yihiin? Ma la igu soo dalacayaa faraqa u dhexeeya?") _____

Markaas weydii: "Waa maxay aniga":

Lacag bixinta: _____ % ama \$ _____ /fadhi. Ma wada-bixinta ama gunnada lacagta maalintii ama daaweyn kasta?

Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu arko OT iyo Hadalka oo aad haysato \$15 lacag bixinta, ma lagugu leeyahay \$15 daawayn kasta oo dhan \$30 ama \$15 keliya maalintii iyadoon loo eegayn inta daawaynta aad aragto.

Lagajari karo? Maya Haa Xadiga Laga Jari karo \$ _____ / qoys ama shakhsi?

Laga jari karo kallandarka sanad kasta? Haa Maya Kajarista bisha ayaa bilaabmaysa: _____

Miyaa la buuxiyay wax laga jari karo sanadkan? Haa Maya Haddii ay haa tahay, waa intee inleeg? _____

Waa maxay taariikhaha kababkayga sanadlaha: _____ ahi _____

Waa maxay kharashka ugu badan ee jeebkayga ka bixi kara? _____

Waa maxay inta ugu badan noloshayda? \$ _____ Immisa ayaa la buuxiyay ilaa maanta? \$ _____

Ma tahay inta ugu badan ee nolosha qoys kasta ama qof kasta? _____

Immisa booqasho ayaa la oggol yahay sannadkii, daawaynta kasta (weydii dhammaan daawaynta - Occupational Therapy (Daaweynta Shaqada, OT), Physical Therapy (Daaweynta Jidhka, PT), iyo Speech Therapy (Daaweynta Hadalka, ST) - xitaa haddii ilmahaagu u baahan yahay mid keliya, markaa uma baahnid inaad wacdo mar labaad mustaqbalka)? _____

booqashooyinka _____ OT, PT, ee _____ Hadalka.

F kasta oo la isticmaalo ilaa taariikhda? Haa Maya Haddii ay haa tahay, sharax: _____

Oggolaanshaha hore miyaa loo baahan yahay Bixiyahayda Daryeelka Koowaad? Haa Maya

Oggolaanshaha hore ee Bixiyaha Daryeelka Koowaad ma looga baahan yahay adeegyo gaar ah sida OT, PT iyo Hadal? Haa Maya

Ma waxa jirta warqad daawo oo uu iisoo qoray Bixiyaha Daryeelkayga Koowaad oo loo baahan yahay? Haa Maya

Ma waxa jirta warqad dhakhtar isoo qoray oo ka timid Bixiyaha Daryeelka Koowaad ee looga baahan yahay adeegyada gaarka ah sida OT, PT, iyo Hadalka? Haa Maya

Hadday haa tahay, weydii waxay u baahan yihiin (tusaale, diiwaannada caafimaadka, warqadda daawada, qiimaynta, warqadda baahida caafimaad, iwm) si ay horay ugu oggolaadaan booqashooyinka ama ay ku siiyaan warqad dhakhtar: _____

Immisa kalfadhi ayaa oggolaanshaha/qorista daawoyinka daboolayaa: _____

Waqti intee le'eg ayaa oggolaanshaha/warqada daawadu dabooli doontaa: _____ ilaa _____

Ma heli karnaa booqashooyin badan oo la oggolaaday marka aan ka daalno booqashooyinka? Haa Maya

Xeerarkan soo socda ma la daboolay?

Daawayn	Koodhka	Haa	Maya

Siyaasaddaydu ma leedahay wax qodobbo ah oo ka-saarid ah sida "daaweynta waxa la dabooli doonaa oo keliya haddii cilladdu ay sabab u tahay shil, jirro ama dhaawac"? Haa Maya

Hadday haa tahay, waa maxay qodobku: _____

Ciwaanka aad ku dirto dacwadaada? _____

***Haddii aad leedahay caymis labaad, buuxi mid kale oo foomamkan ka mid ah caymiskaas sidoo kale.

Haddii aad leedahay Akoon Keydka Caafimaadka ama akoon nooc kale ah oo bixiya adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, kala hadal adeeg bixiyahaaga sida kababkan loogu isticmaali karo adeegyada barbaarinta.

Fahamka Caymiskaaga Caafimaad **Bogga4**

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen, ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhiyaha Qaybaha Telefoonka) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION FS_0034 SM (07-2023) Somali